

# BIBLIOTEK | VÄRMLAND

## Ku soo dhawow Maktabada Värmland!

**Codsiga kaarka amaahda ee caruurta laga bilaabo 5 sano ilaa iyo 18 sano.**

Magaca hore: \_\_\_\_\_

Magaca dambe: \_\_\_\_\_

Lambarka shakhsiga ah/Lambarka aqoonsiga: \_\_\_\_\_

Cinwaan: \_\_\_\_\_

Lambar boosto iyo goobta boosta: \_\_\_\_\_

Telafoon: \_\_\_\_\_

E-post: \_\_\_\_\_

Anigu waxaan doonayaa inaan helo fariin

ka hor intaan wakhtiga amaahdu dhamaan:

SMS:  E-post:

### WARBIXINTA KU SOCOTA DADKA HAYSTA MAS'UULIYADA SHARCI EE ILMAHA

Kaarka amaahdu wuxuu ku shaqeeyaa dhamaan maktabadaha ku jira wada-shaqaynta Maktabadaha Värmland, eeg [www.bibliotekvarmland.se](http://www.bibliotekvarmland.se).

Haddii wax ka mid ah macluumaadka aad kor ku dhiibtay ay mar dambe is-badalaan, waa inaad is-badalkan u soo sheegto mid ka mid ah maktabadaha ku yaala Värmland.

Xilliga aad dhiibayso codsigan kaarka amaahda waxaad helaysaa qawaaniinta amaahda ee ansaxa ah marka caruur amaahato, waa marka aad dhiibayso codsigan. Fiiro gaar ah u yeelo in qawaaniinta amaahda ay is-badali karaan. Waxaad mar kastaba qawaaniinta amaahda ee ka jira degmadaada ka helaysaa bogga internetka ee degmada iyo maktabadaada. Marka caruurta kaarkooda amaahda ku isticmaalaan maktabad ku taala degmooyinka kale oo ka tirsan Maktabadaha Värmland, waa inaad ogaataa nooca qawaaniinta halkaas ka shaqaynaya.

Macluumaadka ku saabsan ilmaha amaahdiisa iyo dalbashooyinkiisa xilligaas jira waxaa lagu diiwaan-geliyaa nidaam kombiyuutar oo ka dhaxeeya maktabadaha ku yaala Värmland.

Tani micnaheedu waa in macluumaadka sirta ah, sida ku cad 40 cutubka 3 § ee sharciga dadweynaha iyo qarsoodiga (2009:400) ay heli karaan shaqaalaha jooga maktabadaha ku jira wada-shaqaynta Maktabadaha Värmland. Shaqaalaha maktabada waxaa waajib ku ah sir qarinta dhanka macluumaadkan sida ku cad sharciga dadweynaha iyo qarsoodiga.

Macluumaadka ku saabsan ilmaha ee maktabadaha ku jira Maktabadaha Värmland ay helayaan waxaa loo maaraynayaa si waafaqsan go'aamada sharciga nidaaminta arrimaha macluumaadka kombiyuutarada ee Midwoga Yurub. Macluumaad faah-faahsan oo ku saabsan sida macluumaadkan loo maareeyo iyo nooca xuquuqda aad leedahay adigaaga diiwaan-gashan waxaad ka helaysaa [www.bibliotekvarmland.se](http://www.bibliotekvarmland.se).

Iyadoo aan saxeexay codsigan waxaan xaqiijinayaa inaan helay macluumaadka kor ku qoran iyo inaan u hogaansamayo inaan raaco qawaaniinta amaahda ee ansaxa ah.

Taariikh: \_\_\_\_\_

Saxeexa qofka

mas'uulka ah: \_\_\_\_\_

Lambarka shakhsiga ah: \_\_\_\_\_

Qoraalka magaca

oo dhamaystirkan: \_\_\_\_\_